

ESKILSTUNA-
DAYADU WAY SII
FIICNAAN KARTAA

# BARNAAMIJ DOORASHO 2022

KUSOODHAWOW!
QAADO NUQULKAAGA!

## SHEEG SIDA WAX YIHIIN. SAMEE WIXII LOO BAAHANYAHAY.

Tani waa barnaamijkayaga la soo koobay oo aan ku sharraxayno waxa aanu doonayno inaanu samayno haddii aanu helno kalsooni sii socota oo ah in aanu hogaamino degmada Eskilstuna. Barnaamijkayaga doorasho ee dheer, ee sii faahfaahsan waxaad ka helaysaa boggayaga intarnatka. Halkaas waxaa ku jira xitaa siyaasado aad u fiican, bandhiga musharaxiintayada iyo waxyaabo badan oo dheeraad ah:

**WWW.SOCIALDEMOKRATERNA.SE/ESKILSTUNA**

Macluumaad bulsho ODR

# JIMMY JANSSON AYAA HADALKA LEH

Eskilstuna waa magaalo fiican lehna fursado waaweyn. Magaalo jaamacad cusub, shirkado caalami ah oo ka samaysmaya, dhismayaal loo dhisayo si xawli ah, daryeel dadweyne oo aanu wakhti dheer ka hor joojinay dhibta sida wakhtiyo shaqo oo kala qaybsan, degmo kaalinta hore kaga jirta hawsha deegaanka iyo cimilada. Laakiin waxaan u baahanahay in la sameeyo dheeraad. Rabshadaha waa inay joogsadaan oo hawlaha shaqo kordhaan. Dadka jooga Eskilstuna oo dhan waa inay qayb ka ahaadaan safarkan aynu bilownay. Eskilstuna way sii fiicnaan kartaa. Ma ballanqaadayno duur dahab iyo cagaar ah laakiin waxaanu ballanqaadaynaa wixii aan ka soo bixi karno. Barnaamijkan waxaad ka helaysaa axpick.

**Waa inaynu xoojino awood haynta dimoqraadiyadeed ee daryeelka dadweyne oo dib u taagno aaminaadda daryeelka dadweyne** – kaas oo maal-gelinyadeena wadajirka ah aanay aadin shirkado macaash doon ah, kuwaas oo khiyaamo oo dambiilinimada daryeel dadweyne la cayrsado.

**Waa inaan sii wadno dib u habaynta cagaaran** si aynu u qaadno qaybteena ah mas'uuliyadda in aynu cagaaransi siino aduun lagu noolaado una abuurno shaqooyinka mustaqbalka iyadoo loo marayo dib u habayn cimilo oo dareen u leh dabaqadaha bulsho. Dad badan waa inay ku shaqo galaan shuruudo shaqo oo fiican.

**Waxaynu ka adkaanaynaa dambiilinimada oo joojinaynaa kala qaybsanaanta** – xoojinta wada-shaqaynta u dhaxaysa booliis, adeeg arrimo bulsho, iskool iyo ururada jaaliyadaha si loo hakiyo in dhalinyarada loogu jiido dambiilinimo iyo xitaa in la xaliyo dembiyada oo shakhsiyaadka khatarta ah laga saaro jidadkeena. Dadka waa in la siiyo fursado ay qayb kaga noqdaan wadajirnimada buulsho – maaha oo keliya taageero, balse xitaa in lagu xiro shuruudo.

**Waxaanu ballanqaadaynaa in aanu qaadno mas'uuliyadda degmada Eskilstuna** – in la awoodo in la hogaamiyo, xukumo oo la horumariyo mar walba oo wada shaqayn lala yeesho xisbiyada nala wadaaga aragtidayada ah dadka oo dhan inay isku qiimo leeyihiin ee diyaar u ah in degmada danaheeda loogu horeysiiyo.

**Waxaan ballanqaadeynaa inaan socodsiino siyaasad dhaqaale oo mas'uuliyad badan leh** oo ku salaysan mabda'a ah in karoon canshuur ka yimi oo kasta oo khasaaray yahay xatooyo iyo in hadafka ugu horeeyaa ahaado in la iska ilaaliyo kordhin canshuur sanadaha soo socda.

**Taageero sii weynaato dhanka dimoqraadiyadda bulsho ee Eskilstuna waxaynu Eskilstuna ka dhigi karnaa mid sii xoogan oo amaan ah.** Si aynu Eskilstuna u sii fiicnaysiino waxaynu u baahanahay inaynu si daacad ah isu ahaano. Aan wax la buun-buunin. Aan indhaha wax laga qarsan. Waxaynu u baahannahay in aynu sheegno sida wax yihiin oo sameyno wixii loo baahanyahay.



ESKILSTUNA-
DAYADU WAY SII
FIICNAAN KARTAA



# JIMMY JANSSON

Jimmy Jansson waa gudoomiyaha hogaanka degmada ee Eskilstuna iyo dabcan musharaxayaga isla hawshaad mar kale.

Jimmy wuxuu sheegaa siday wax yihiin oo sameeyaa wixii loo baahanyahay. Wuxuu goor hore dhinaca degmooyinka Iswiidhan ahaa qof arka ee weliba ficil sameeya dhinaca dhibaatooyinka soo raacay kala qaybsanaanta bulshada cawaaqibkeeda. Badanaa waxaa isaga lagu arkay saxaafadda qaranka ee dhinaca tallaabooyinka iyo falanqaynta waagi hore loo arki jiray mid xagjir ah laakiin imminka ay la wadaagaan dad badan.

Jimmy waa 42 sano oo asal ahaan waa macallin. Wuxuu la noolyahay xaaskiisa iyo saddex carruur ah oo xiisahiisa ugu weyn ee wakhti firaaqaha waa inuu hagaajiyo oo kaxaysto baabuurkiisa gaboobay ee Volvo Amazon 121 kana yimi 1965.

# DAMBIILINIMADDA WAA IN LAGA ADKAADO OO KALA QAYBSANAANTA BULSHADA LA JOOJIYO SI LOO ABUURO AMAAN IYO WADAJIR BULSHO




**Dambiilinimada daryeelka dadweynaha waa in lala dagaalamo oo aaminaadda daryeelka dadweyne la difaaco.** Hawsha in la helo heshiisyo kiro oo suuqa madow ah, furniinyo been ah iyo lacago lagu qaato khalad oo ah kaalmo bulsho waa in la dardar geliyaa.

**Kala qaybsanaanta bulshada waa in la joojiyo oo wadajirnimada bulsho la kordhiyo.** Carruurtu waa in aanay ku soo korin xaafado wax dad waaweyn ahi aanay shaqo tegin – sidaas darteed waa in waajibka hawl ee dadka qaata taageerada masruufka la dhaqan-geliyo. Ku noolanshaha ciriiriga waa in laga hortagaa dhinaca guryaha degmada iyadoo wada shaqayn lala yeelanayo guri kireeyaasha gaarka loo leeyahay. Dhinaca siyaasad hoy oo firfircoon waa in kala qaybsanaanta bulsho laga hortago – shuruud waa in laga dhigo dakhli kale oo aan ahayn taageerada masruufka dhinaca heshiis kiro dhanka xaafadaha qaarkood iyo weliba xadaynta tirada ku nool calaa guri waa qaabab noocaas ah. Tirada xarumaha qoysaska waa inay korodho. Horumarka luqadda ee carruurta dhigata dugsiga xanaanada waa in la xoojiyo. Shaqaaluhu waa inay lahaadaan aqoon macallinimo iyo luqadeed si ay uga soo baxaan hawshooda. Dhinaca xaaladaha taasi gabaabsi tahay waa shaqo bixiyaha mas'uuliyadiisa in tallaabo laga qaado taas.

**Dambiilinimada waa in dib loo cadaadiyo oo la adeegsado awoodda degmada oo dhan oo urursan.** Wax ah xaafado muhiimad la siiyay ama dhibaataysan sida ku xusan khariidadda booliiska waa in aanay ka jirin Eskilstuna. Waxaan u hawl-galaynaa in aan noqono degmo tusaale fiican u ah ka hortegidda dambiyadda hawsheeda. Adeega arrimaha bulshadu waa inuu wax u qabto si ah farogelin oo si wadajir ah ay booliiska u farogeliyaan qoysaska ay ku jiraan shakhsiyaad looga shakisanyahay inay ku hawlan yihiin dambiilinimo. Hawsha ka hortagidda dambiyadda waa inay ku korodho dadaalkayaga Dhalinyaro Amaan ah kaas oo degmadu wada shaqaynta ay la leedahay adeeg arrimo bulsho, booliis iyo iskoolo ay u tahay muhiim. Tirada waardiyayaasha nidaamka waa inay badato oo ka warhaynta kamaradaha ay ku korodho xaafadaheena iyo weliba dugsiyadeena sare. Tiro ah goobo amaan ah oo la garanayo waa in la abuuro oo halkaas ay dadweynuhu la xiriiri karaan si loo helo macluumaad iyo caawimaad. Degmada u diyaar garowgeeda marka dhibaato weyn dhacdo waa in la xoojiyo oo xarun dab-damis kale la dhiso.

**Dhammaan muwaadiniintu waa inay dareemaan amaan oo ogaadaan nooca qiimaynaha ansaxa ah.** Hawsha ka hortaga dagaal rabshad ah dhinaca xiriir dhow, iyo weliba dagaalka rabshad ah ee la xiriira sharafta iyo cadaadiska waa in ahmiyad la siiyo. Waxbarasho ku salaysan sharciyada, xeerarka, heerarka iyo qiimaynaha waa in la fiicnaysiiyo oo si firfircoon dadka loogu casuumo iyadoo shuruud uu ka qaybgalku ku yahay dadka dalka ku cusub, ardayda SFI, waalidka iyo kooxaha kale ee bartilmaameedka ah ee u baahan. Caafimaadka ardayda iyo kooxda amaanka ee iskooladeena waa inay xilliga wada hadalka bilaabidda ay kor u qaadaan arrimaha khuseeya dhaqanka sharafta. Xitaa iskoolada warsashooyinkooda ardayda waa inay ku jiraan su'aalo khuseeya dagaalka rabshadaha sharafta iyo cadaadiska si loo daraasadeeyo sawirka dhibaatadan ee heer iskool.

**Qaabilaadda qaxootiga ee Eskilstuna waa inay ahaataa heer aan gacan ka geysan shaqo la'aanta, ciriiriga hoyga, gabaabsi natiijo iskool iyo arrimaha kale ee muhiimka ah ee kordhiya dabaqado bulsho ee abuura sinnaan la'aan.** Waxyaabo ka reeban way jiri karaan xilliga xaalado dhibaato degdeg ah. Waa wax aan ahayn qaabilaadda xad dhaafka ah ee aan nidaamsanayn ee dalalka iyo degmooyinka qaarkood ay qaateen mas'uuliyad aad u weyn oo aan dheeli-tirneyn, wadatana shaqo la'aan aan loo baahnayn, kala qaybsanaan bulsho iyo ciriiri hoy oo ah natiijo. Waxaanu doonaynaa in EBO la joojiyo iyo in dadku ay hoos yimaadaan daryeelka dawladda ilaa iyo maalinta qofku shaqaynayo ee keligii is masruufayo.



# DAD BADAN MARKAY SHAQO GALAAN, SHURUUDO SHAQO OO FIICAN IYO DARYEEL DADWEYNE OO LA XOOJIYAY WAXAY DHISAYSAA MAGAALADEENA



**Dad badan waa inay shaqo galaan oo shuruuduhu waa inay fiicnaadaan.** Waa in aynu lahaano waxbarashooyin xirfad iyo jaamacado xirfadeed oo lagu helo shaqo. Waa in aan dadka ku casuumnaa xalyo isku duuban oo shaqo iyo hoy la siiyo dadka shaqo ka raadiya xirfadaha ay shaqaaluhu gabaabsi ku yihiin gudaha Eskilstuna. Waxbarashooyinka xirfadeed maqaamkooda waa in la sii wadaa in kor loo kiciyo oo ay ka mid yihiin kuleejo xirfadeed, waxbarashooyin wax lagu barto goob shaqo iyo iskoolo la xiriira laamo ganacsi. Heshiis guud waa in shuruud laga dhigo dhinaca dhammaan qandaraasyada. Dhar shaqo waa in loo iibiyo dhammaan shaqaalaha degmada ee dhanka xirfadaha sidaas u baahan. Waa inaynu sii wadno in lagu dadaalo shaqooyin buuxa oo laga hortago wakhtiyo shaqo oo kala qaybsan. Dadka leh hoos u dhac awoodaha laxaadka ah waa inay helaan fursado shaqo iyo nolol shaqo oo sinaan leh. Si carruurta iyo dadka waaweyn ee leh hoos u dhac awooda laxaadka ah ay ugu noolaan karaan nolol madaxbannaan oo ammaan ah waxaa loo baahanyahay wada shaqayn gudaha degmada ah iyo mid lala yeesho qaybaha kale iyo qaab hawleed cusub lehna xalyo farsamo oo caqli leh, sida tusaale ahaan makiinado, furayaal dijitaal ah iyo barnaamijyo farsamo.

**Iskoolku waa inuu carruurta oo dhan siiyo bilow fiican oo nolosha ah – maaha in la naaxiyo maalqabeenka macaash doonka ah.** Kooxaha carruurta tiradooda dhinaca dugsiga xanaano waa inay ahaato mid ka hooseysa ta celcelis ahaan dalka oo dhan. Daryeelayaasha carruurta waa inay awoodaan inay u sii gudbaan waxbarashada macallin dugsi xanaano xilliga wakhtiga shaqo. Dadaalo wakhti hore waa in la sameeyo si loo ogaado ardayda. Kooxo waxbarasho oo gaar ah waa in la dhaqan-geliyo xitaa dhinaca ardayda da'doodu yartahay. Ardayda baahi qaba waa in lagu casuumo caawimaad dheeraad ah oo joogto ah inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka. Macallimiin takhasus leh oo badan iyo macallimiin gaar ah waa in shaqaalaysiiyo. Hoyga wakhti firaaqaha hawshiisa waa in la hubiyo tayadiisa. Wada shaqaynta lala leeyahay gobolka ee dhinaca

ardayda caafimaadkooda maskaxiyan waa in la fiicnaysiiyo. Waxaanu rabnaa in la joojiyo bilaabitaanada cusub ee iskoolo shirkado saami leeyihiin ee gudaha degmadan, laakiin la sii wado dhisidda iskoolo cusub oo casri ah.

**Dadkeena waayeelka ah waxay u qalmaan inay ku gabobaan si micno badan iyo amaan xanaano.** Waxaanu doonaynaa inaanu Hällby iyo Skogstorp ka dhisno hoy daryeel iyo xanaano oo cusub oo kuwaas agtooda loo qorsheeyo hoyga amaanka. Shaqaalaha aasaasiga ee xanaanada waayeelka waa in la xoojiyo si loo yareeyo wareega shaqaalaha. Degmadu waa inay xilliga qaadashada shaqaale cusub ay hubisaa in shaqaaluhu si buuxda ula hadli karaan dadka. Si loo joojiyo kelinimada dhinaca dadka waayeelka ah waxaanu doonaynaa inaanu oggolaano dhismayaal bilaa kharash ah oo la siiyo ururada dadka hawl-gabka ah iyo weliba in la taageero oo la dhiiri-geliyo hawlaha dhinaca ururada dadka waayeelka ah.

**Daryeel caafimaad oo la aamino, kaas oo dhow oo leh tayo fiican.** Daryeel caafimaad iyo bukaan oo siman wuxuu keenayaa in qofka baahida ugu weyn qaba uu helo daryeel caafimaad ugu horeyn. Safafku waa inay yaraadaan. Daryeelka caafimaadka waa inuu xitaa ku haboonaado si ku salaysan dadka xaaladahooda iyo fursadahooda ah in ay iska haqab-tiraan. Noocyada kala duwan ee doorashada daryeel caafimaad waxay isbitaalada ka dhaceen aqoon muhiim ah ama ku khasbaan bukaan socotada inay daryeel caafimaad ka raadsadaan daryeel bixiyayaal kala duwan inkastoo aanay taasi macquul ahayn dhinaca sababaha caafimaad – sidaas darteed ayaan uga soo horjeednaa furitaanada xorta ah ee shirkadaha gaarka loo leeyahay ee daryeelka caafimaadka.

**Maal-gashiyada isboortiga iyo dhaqanka waxay helayaan tayo nolol oo korodha.** Waxaanu doonaynaa inaan dhisno laba hool oo cusub oo kubadda cagta ah oo weyn iyo ugu yaraan doog aan run ahayn oo la diiriyo kuna yaala Ekängen iyo weliba fulinta dib u habaynta fagaare iyo jardiino iskool iyadoo taasi aanay wax cawaaqib ah ku yeelan lacagta ardayda. Degmadu waa inay dadka ku casuunto fursadda baraf sanadkii oo dhan. Taageerada ururada waa inay ku koobnaataa ururada taageera qiimaynaha dimoqradiyadeed. Taageerada lacageed ee isboortiga carruurta iyo dhalinyarada ka qaybqaadashadooda waa inay korodho. Nolosha ururada waxay door aad muhiim ah u leedahay is dhexgalka bulshada oo waa in lagu taageero hawshaas. Farshaxanka guud waa in la daryeelo oo si la mid ah isboortiga ay ahaato wax ay heli karaan muwaadiniin badan.



# MAGAALADEENA CAGAARAN EE HORUMARSAN WAA IN DEGMADA OO DHAN NOOLAATO OO HORUMARTO



**Eskilstuna waa inay noqoto degmada ugu fiican Iswiidhan dhinaca shirkadaha yar iyo kuwa meel dhexaadka.** Waa inaan xoojino ahmiyadda in shirkadaha jiraa ay awoodaan inay kobcaan oo kuwa cusubna samaysmaan. Eskilstuna waa inay fiicnaysiiso kaalinteeda dhinaca liistooyinka darajada ee dhinaca qaybta ganacsiga. Qandaraasyada waa in loo habeeyho si suurtagelinaysa in shirkadaha maxaliga ah ay dhiibtaan hindise. Dambiilinimada ka dhanka ah shirkadaha waa in ahmiyad la siiyo oo laga hortago iyadoo iskaashi lala yeelanayo qaybta ganacsiga ee maxaliga ah.

**Eskilstunas faras magaalaheedu waa inuu noqdo mid soo jiidasho leh.** Webiga yar waa inuu ahaado qayb soo jiidasho leh oo ka mid ah magaalada. Ag-agaarka degmada goobaheeda lagu ciyaaro ee waaweyn iyo meelaha kale ee madadaalada waxaanu doonaynaa inay lahaadaan musqulo iyo fursad dhinaca dukaan ama cabitaan lagu iibiyo. Si loo xoojiyo doorka magaalo arday ahaan loona soo jiito u soo guuridda ardayda waxaanu rabnaa inaan u hawl galno nolol banaanka ah oo firfircoon.

**Eskilstuna waa inay ku sii socoto inay kaalinta hore kaga jirto dhinaca dareensanaanta dib u habayn cagaaran.** Waxaanu wax ka badali doonaa hawlaha weli laga isticmaalo saliid hoos yimaada maamulka degmada. Guri kireystayaasha iyo xaqlayaasha guri waa inay fursad u helaan jaaj-garaynta baabuurta korontada ku shaqaysa. Waxaan rabnaa inaan shirkadaha u fudeydino inay dhisaan goobo kolba meel loo wareejin karo oo leh meelo dhakhso loogu jaaj-garaysto, cunto iyo musqulo ku yaala wadooyinka laga soo galo. Shabakadda jidadka baaskiilada waa in ay isku xiriirsanaato oo ay si fiican ugu xirantahay faras magaalaha. Balaarinta basas bilaa kharash ah iyadoo ahmiyadda la siinayo kooxaha, sida dadka hawl-gabka ah, waa inay sii socoto. Adeega xumaaday iyo qiimo korodhka naxdinta leh ee tareenada Mälartågen keentay waxay u baahantahay in tallaabo laga qaado. Dambiilinimada deeganka waa in lala dagaalamo. Sii wadista dhisidda ay ka mid tahay guryo dhalinyaro iyo guryo amaan ah waa inay ku sii socotaa si u fiican cimilada.

**Xaaladda taraafikada waa in la xaliyo oo meelaha baabuurta la dhigtaa ay bataan.** Si looga hortago inay samaysmaan safaf aan loo baahnayn oo wata sababo qiiq ka baxa waxaan rabnaa in aan socodsiino in gaadiidka qunyar u socda laga mamnuuco meelaha qaarkood, tusaale ahaan meesha Västerleden. Jidad badan waa in loo furo taraafikada baabuurta oo tirada meelaha baabuurta la dhigto ee faras magaalaha ay badato, tusaale ahaan halka ku dherersan Nygatan. Khidmadda baabuur dhigashada waa inay dardar geliso xarun magaalo oo firfircoon iyo in la fududeeyo lacag bixinta baabuur dhigashada.
Waa inaan talaabo ka qaadno dhibaatada taraafikada ee tusaale ahaan goobaha gooladaha ee Djurgårdsskolan iyo jidka Gap Sundin oo hoos loo dhigo xawaaraha halkii u baahan, tusaale ahaan iskoolka Lagersbergsskolan.



**Baadiyuhu waa inuu ku noolaado waxyaabo ay ka mid yihiin goobo adeeg, dukaano bilaa shaqaale ah iyo gaadiid dadweyne oo la dalban karo.** Waa in aan ilaalino dhul beereedka jira oo horumarino kobcinta raashin meel dhow laga soo saaray oo suurtagelino qandaraasyada waxyaabo si maxali ah loo soo saaray iyo cunto lagu kariyay goobaha gaarka u ah degmada. Waa inaan u hawl galnaa telafoon shaqaynaya iyo intarnat si fiican u dhisan. Qurxinta guud waa in ahmiyad la siiyo xitaa banaanka faras magaalada.

# WAXAAN XAQIIJINAYNAAN WIXII AAN BALLANQAADNO

Intii lagu jiray muddadan maamulka wax badan ayaa dhacay. Qaladaadka caadiyan laga fahamsanyahay in siyaasiyiintu wax badan ballanqaadaan oo aanay ka soo bixin hawsha waxaa taas ka soo horjeedkeeda run ahaantii jirta in siyaasiyiinta iyo xisbiyada Iswiidhan badankooda, iyadoo aan loo eegin noocooda, ay fuliyaan wixii ay sheegeen inay rabeen in ay sameeyaan. Intii lagu jiray muddada maamulkan waxaanu dhinacayaga haystay aqlabiyad siyaasadeed aan kaga dhabaynay waxyaabahan:

**Kuliyadda Mälardalen waxay noqotay jaamacad.** Dabcan taasi maaha arrin degmo laakiin hawl badan oo annaga iyo kuwii naga horeeyay ay qabteen ayaa keentay in kuliyadda markeedi hore la dhiso oo kelya maahee in xitaa ay noqotay jaamacad.

**1000 shaqo xilliga xagaaga.** In la shaqeeyo xilliga xagaaga waxay aad muhiim ugu tahay dhalinyarada iyo bulshada. Dhalinyaradu waxay dareemayaan xorriyadda miraha shaqo oo waxaa u sahlanaanaysa in ay soo galaan suuqa shaqada.

**Dhismayaal cusub oo daryeel dadweyne.** Guryaha dadka waayeelka ah, dugsiyada xanaanada, dugsiyada sare iyo iskoolo cusub ayaa la dhisay ama dib loo dayactiray si dhakhso ah.

**Dhalinyaro amaan ah**, waa magaca dadaal weyn oo ah 30 milyan oo karoon sannadkiiba. Dadaalkan wuxuu kulansiiyaa adeega arrimaha bulshada, hawlaha wakhti firaaqaha, iskool iyo booliis. Wuxuu ku salaysanyahay in wakhti hore la helo dhalinyarada faraha ka sii baxaysaa, la siiyo wakhti firaaqo micno leh oo si dhakhso ah loo awoodo in la sameeyo dadaalo ka imanaya booliiska iyo adeega arrimaha bulshada haddii sidaas loo baahdo.

**Tallaabooyinka ka hortaga kala qaybsanaanta bulsho**. Dadka badan ee horey u soo deggey ayaa keentay kala qaybsanaan bulsho oo baahsan dhinaca dhowr ah xaafadaheena. Si taas looga hortago waxaanu dhaqan-gelinay waxyaabo ay ka mid yihiin shuruud dakhli dhinaca shirkadda guryaha ee degmadu leedahay. Xaafad ay ku badanyihiin dad aan shaqo aadin maaha xaafad fiican.

**Waajibka hawl qabasho si loo helo taageero masruuf** waxaan ahayn mid ka mid ah degmooyinki ugu horeeyay dalka ee socodsiiya. Qofkii aan qabin jiro ama dhib la mid ah, waa khasab inuu fuliyo hawl qabasho ku haboon shakhsiyan si uu u helo taageero masruuf. Taasi waxay ahaan kartaa in la barto Iswiidhishka ama xirfad. Dhammaan dadka awooda waa inay shaqeeyaan.

**Shaqo iyo waxbarashooyin xirfadeed oo buux dhaaf noqda**. Iyadoo markii hore Eskilstuna lahayd shaqooyin aad u yar ayaa imminkana ay ku jirtaa xaalad ah in ay jiraan shaqooyin badan oo ay sabab u tahay hawshayada ku hadafka ku jiheysan ee ah in halkan la keeno shirkado badan, laakiin ay yartahay dadka raadiya kuwaas. Sidaas darteed ayaa imminka ay u jiraan waxbarashooyin xirfadeed oo aad u tiro badan.

# DHOWR LUQADOOD

## Boggayaga intarnatka waxaad ka helaysaa barnaamijkayaga doorasho oo ku qoran dhowr luqadood:



Fiinishka



Ingiriisi

العربية

Carabi



Soomaali

www.socialdemokraternaeskilstuna.se/var-politik/valprogram/

Dhanka www.val.se waxaad xitaa iyadoo dhowr luqadood ah ka akhrin kartaa sida doorashadu u dhacdo, sida loo codeeyo, qofka loo oggolyahay coddeyn iyo waxyaabo dheeraad ah.

---



ESKILSTUNA-
DAYADU WAY SII
FIICNAAN KARTAA

# NOQO XUBIN

Xubin kasta oo cusub waxaan ku sii noqonaynaa awood xoogan dhinaca siyaasadda Iswiidhishka taas oo si wadajir ah uga shaqayn karta in la helo bulsho sii xoogan, amaan ah oo leh sinnaan dheeraad ah. Iswiidhan-teenu way sii fiicnan kartaa.

Adigu waxaad xubin ku noqon kartaa dhowr qaab. Haddii aad leedahay Swish waxaad aabkaaga Swish ku isgaan garayn kartaa QR-koodka halkan hoose ku yaala oo raac tilmaamaha.

Waxaad xitaa geli kartaa www.socialdemokraterna.se oo riixdaa ”bli medlem”.

Xitaa waad na soo wici kartaa: 070-780 80 39

Socialdemokraterna

Swish. Betala enklare.

Socialdemokraterna i Eskilstuna • Kungsgatan 14 • 632 30 Eskilstuna
www.socialdemokraterna.se/eskilstuna • eskilstuna@socialdemokraterna.se
socialdemokraternaieskilstuna